




**TAKOORKA
GURIYEYNTA
WAA SHARCI DARRO.**



“Abarmankaan looma sameynin qof isticmaala kursiga lugaha ku socdo, mana rabo in aad wax baddashid.”

“Aniga waxaan maqlay in xaaskaada tahay xaamilo. Ma rabno in caruur ku noolaadaan halkaan. Qasab ayay kugu tahay in aad guurtid dhamaadka kiradaada.”



“Aniga ma fahmi kari sida aad erayada ugu dhawaaqdid. Aniga kuma qanacsani in aan ka kireeyo qof aan la xariiri karin.”

Cambridge gudaheeda, waa sharci darro in qof loo diido guri taasoo ugu wacan:

- ✓ Itaal Darri
- ✓ Meesha uu Qofka ka Helo Dakhliga (tusaale: diidmada in la ogolaado Section 8)
- ✓ Xaaladda Qoyska/Xaaladda Guurka
- ✓ Isirka/Midabka/Asalka Qaranimada
- ✓ Jinsiga/Jinsiga Qofka Doono/Aqoonsiga Lab ama Dhedig
- ✓ Diinta
- ✓ Da’da (18 sanno ama ka weyn)
- ✓ Xaaladda Militariga

Haddii adiga ama qof aad ogsoon tahay la kulmay takoorka guriyeynta wac Guddiga Xuquuqda Aadanaha Cambridge (Cambridge Human Rights Commission) iminka, telefoonka (617) 349-4396.



WAXAAN:

- ✓ Baari doonaa ashtakada
- ✓ Haddii aan aragno takoor, waxaan ka shaqeyn doonaa in lagu dhameeyo dhexdhexaadin.
- ✓ Haddii loo baahdo, waxaan qaban doonaa dhageysiga sharciga kaddibna waxaan dalban karnaa lacag mag dhaw oo la xariira khasaarada, waxaan saari karnaa ganaax, ama waxaan dalban karnaa in la qaado talaabado kale

Kaddibna Guddiga Xuquuqda Aadanaha Cambridge (Cambridge Human Rights Commission) wuxuu iskudayi doonaa in uu habsado in waxa adiga kugu dhacay aysan ku dhicin qof kale!

Dadka loola dhaqmo si caddaalad darro ah maxaa yeelay wuxuu ka tirsan yahay mid ama ka badan kooxahaan soo socda waxay badbaadin ka helaan Sharciyada Caddaaladda Guriyeynta (Fair Housing Laws).



MAXAA

LOOLA JEEDAA

TAKOORKA GURYAHA?

✓ Waa marka lagu dhaqaaqo mid ka mid ah falalkaan maxaa yeelay waxaad tahay xubin ka tirsan koox la badbaadiyo:

MARKA QALDAN EE LOO SHEEGO GURYAHA LA HELI KARO: Maamulaha hantida, milkiilaha, ama wakiilka hantida maguuraanka kuu sheego in abarmanka, guriga, ama kondomiiniyaha aan la heli karin iyadoo la heli karo.

MARKA LA DIIDO IN LA KIREEYO AMA LA IIBIYO: Marka maamulaha hantida ama aqoonyaanka hantida maguuraanka kuu diido in uu kaa kireeyo ama kaa iibiyo adiga.

MARKA LALA KULMO TAKOORKA QODOBADA IYO SHARUUDAHA: Marka adiga lagu siiyo qodob ama sharciyo ka duwan kuwa la siiyo dadka kale.

MARKA LAGUU DIIDO GURYAHA MACQUULKA AH: Marka maamulaha hantida kuu diido ka-dhaafidda sharciga ama siyaasadda taasoo qofka itaalka darran siin doonto sinaan uu ku isticmaalo kuna raaxeysto abarmanka.

MARKA LALA KULMO TAKOORKA: Marka lagaa hor istaago in aad dalbatid ama heshid deynta guriga, ceymiska milkiilaha guriga ama ceymiska kireystaha.

Maamuleyaasha hantida, iibiyeyaasha iyo wakiilada hantida ma guuraanka waa in ay arjiileyaasha u tixgeliyaan si dhexdhexaad ah, sida awoodda ay u leeyahiin in ay bixiyaan kharashka. Sharuudahaan waa in lagu fulliyo dhamaan iyo si siman. Takoorka wuxuu leeyahay qaabab badanqaab.



WAA SHARCI DARRO:

- » In la niyad jebiyoo ama la diido in qofka loo ogolaado in uu dalbado guri
- » In been la sheego si loo inkiro in guriga diyaar u yahay fattashaad, iibin ama kiro
- » In la soo dallaco ama la sheegto sicir sare oo lagu kireeyo ama lagu iibiyo hooyga.
- » In arjiilaha loo diido guri marka la ogaado in uu qaato kaalmada dadweynaha (sida Section 8)
- » In qoyska haysta caruur loo diido guriga taasoo ugu wacan guriga oo leh rinjiga macdanta
- » In la geysto takoor ku saleysan xayaysiin, qoraal ama warar afka laga sheego
- » In la geysto kadeed, ama cabsi gelin ka soo horjeedo qof ka tirsan koox la badbaadiyo
- » In qofka laga aargoosto marka uu ku adkeysto xuquuqdiisa caddaaladda guryaha
- » In qofka loo diido guri macquul ah ama loola dhaqmo si xun maxaa yeelay waa qof itaal darran
- » In la faafiyo warar la xariira isbaddalka isirka si loo dhalliyo iibinta hantida
- » In xaafadaha qaar loo diido deynta lagu iibsado guriga ama ceymis

Si aad u heshid qoraal buuxa oo ku saabsan Sharciga Caddaaladda Guriyeynta Cambridge (Cambridge Fair Housing Ordinance), booq boggena internetka:

www.cambridgema.gov/HRC
ama naga soo wac telefoonka
(617) 349-4396.



Hawsha aasaaska u ah daabacaaddaan waxaa taageeray maal gelin hoos timaada. Heshiiska Iskaashiga ee lala galay Waaxda Guriyeynta iyo Horumarinta Magaalada Mareykanka (Cooperative Agreement with the U.S. Department of Housing and Urban Development). Nuxurka iyo waxyaabaha laga ogaaday hawshaan waxaa loo hibeyay dadweynaha. Qoraha iyo daabacaha keliya ayaa mas'uul ka ah sax ahaanta wararka iyo tarjamada ku jirto daabacaaddaan. Tarjamada noocaan ma matalaan fikradaha Dawladda.

